Sergio Keck
Director of Special Populations & Community Outreach
sergio.keck@lansingschools.net
Phone: 517.755.2945

**fasaxisda shaashada dugsiyada degmada lansing si loo baaro sua'aalaha iyo jawaabaha dayrta tuwani tuwani - Somali**

**1. Ardaydu ma ku laaban doonaan dugsiga dayrta?**
Haa, dhammaan ardaydu way ku laaban doonaan fasalada ku yaal Degmada Dugsiyada Lansing, waxaa wax lagu baran doonaa kumbiyuutarka khadka tooska ah sagaalka usbuuc ee ugu horreeya.

**2. Imaanshaha iyo kaqeybgalka fasalka qadka tooska ah waa qasab?**
Haa, sidii ardaydu oo kale jir ahaan dugsiga ayey ku jireen. Darajooyinka waxay ku xirnaan doonaan kaqeybgalka ardayda iyo shaqada fasalka.

**3. Kawaran hadaanan haysan kombiyuutar?**
Haddii ilmahaagu helay kombiyuutar guga, waxay sii wadi doonaan adeegsiga kumbiyuutarkaas si ay waxbarashadooda u sii wataan. Haddii kale, fadlan hoos ka fiiri macluumaadka qaybinta ee hoose ama la xiriir dugsiga ilmahaaga. Waalid,ilaaliye ama xiriiriyaha xaaladaha deg-degga ee diiwaanka dugsiga wuxuu u baahanan doonaa inuu keeno sawir aqoonsi oo sawir looga qaado kumbiyuutarka.

**Goobta: Don Johnson Fieldhouse**
220 N Pennsylvania Ave
Lansing, MI 48912

**Taariikhaha & Waqtiyada:**

**PRE K - Fasalka 3aad**
**Ogosto 13, 14, 17**
**10 a.m. - 7 p.m.**

**Fasalka 4aad - 12aad**
**Ogosto 24, 25, 26, 27, 28**
**10 a.m. - 7 p.m.**

**4. Miyaan u baahanahay inaan kombuyutarkayga ku soo celiyo dugsiga degmada?**
Qalabka oo dhan waxaa iska leh iskuulada Lansing; waalidiinta waxaa laga filayaa inay bixiyaan lacagta magdhawga kombiyuuterka hadii uu jaban yahay markay soo celiyaan.

**5. Ayaa mas'uul ka ah hubinta in carruurtayda ay qabtaan shaqadooda iskuulka?**
Waaliddiinta ayaa mas'uul ka ah inay hubiyaan in dhammaan ardayda gurigooda ku nool ay xaadiraan fasalka kumbuyuutarradooda ayna keenaan oo ay soo celiyaan home waagooda, sidii ardayda oo kale jir ahaan dugsiga ayey ku jireen.

**6. Maxaa dhacaya haddii waalidku shaqeeyaan oo aysan guriga joogi karin?**
Degmadu waxay ku hawlan tahay inay aasaasto iskaashi lana yeelato ururada bulshada si ay taageero ugu fidiyaan qoysaska aan awoodin inay ka shaqeeyaan guryaha.

**7. Ardaydu miyey ku shaqeyn doonaan shaqada iskuulka kumbuyuutarradooda maalinta oo dhan?**
Arday kasta wuxuu raaci doonaa jadwal ay ku jiraan biririfta, waqtiyada cuntada, iyo nashaadaadka jirdhiska. Waxaa ka

mid noqon doona kooxda oo dhan, koox yar, iyo hagitaan shaqsiyeed, iyo sidoo kale fursadaha farshaxanka, muusikada, jimicsiga jirka, barashada shucuurta bulshada, iyo nashaadaadyo kale usbuuc kasta.

**8. Fasalada ma la duubi doonaa haddii ardaygu maqanyahay?**
Haa - Dhammaan fasaladu waxay duubi doonaan macallimiinta (maahan ardayda); casharada ayaa markaa la heli karaa si dib loogu eego wakhti kasta.

**9. Cunno ma la bixin doonaa?**
Haa, xarumaha cuntada qaybinta ayaa laga heli doonaa magaalada oo dhan iyo adeegyo gaarsiinta qoysaska aan gaadiid haysan.

**10. Degmadu ma bixisaa alaabada dugsiga?**
Haa, ardayda oo dhami waxay heli doonaan alaabada iskuulka